

Maxaad u baahantahay inaad ogaato xaaladda Coronavirus ee Kenya dhexdeeda? - CORONAVIRUS -COVID-19

1. Ma ka jiraan keesas la xaqiijiyay ee cudurka Coronavirus wadanka Kenya?

Haa. Haddii aad ka shakido in adiga ama qof kale oo kuu dhaw uu taabatay qof kaso socdaalay ama kaso safray wadamada uu xanuunka Coronavirus ka jiro 14kii maalmood ee u dambeeyey, la xidhiidh wasaaradda caafimaadka 0800721316 (Bilaash); 0732353535; 0748592558.

2. Sidee loo gudbiya ama loo faafiyaa cudurka Coronavirus? Coronavirus wuxuu ugu kala gudbaa qof iyo qof kale iyada oo laiskugu gudbinayo dhibacyo sida qufaca. Sidaa daraadeed inaad qofka xanuunka qaba ka fogaato masafo dhan hal mitir iskana ilaaliso inaad gacan qaado(salaanto) waxay kaa caawineysaa ama ka hortagaysaa inaad xanuunka qaado.

3. Maxaan sameyn kartaa si adiga iyo dadka kale aad uga ilaaliso in uu san ku dhicin cudurka Coronavirus?

✓ Yaree inaad dadka dhex gasho ama isku imaanshada bulshada

✓ Kudhaqan gacmo meydhiidh (dhaqis) jooqta ah kuna maydho ama kudhaqo saabuun iyo biyo

✓ Ku dabool afka iyo sanko maro marka aad qufacayso ama hindhisayso si aad dadka kale uga ilaaliso in ay kaa qaadaan xanuunka.

4. Side ayaan ku ogaan karaa inaan xanuunka qaaday ama igu dhacay?

Calaamadaha guud ee cudurka lagu garto waxa ka mida ah calaamadaha hawo mareenka, qandho, qufac badan, neefta oo kugu yaraata, iyo neefsashada oo kugu adkaato.

Ogow marka uu xanuunku sii xumaado waxa dhici karta inay keento buronkiinto ama naqaska oo kugu dhaga, xanun daran ee dhinaca hawo mareenka, kilyaha oo fadhiista, iyo xitaa dhimasho.

5. Maxaan sameeyaa haddii aan isaga shakiyo inaan qabo calaamadaha cudurka? Haddii aad isku aragto calaamadaha kor lagu sheegay mid ka mida, ka fogow is dhexgalga bulshada, waxaad wacdaa 0800721316 (bilaash) jooq gurigaaga inta aad ka helesid hagitaan ama aqbaar.

6. Ma usafri karaa meel ka baxsan Kenya xiligaan? UNHCR ma dhiiri gelinayso in safar la galo dibada waqtiga xanuunkani uu jiro.

Gacmahaaga dhaq

Kudhaq gacmahaga saabuun iyo biyo Marka ay gacmaha si muuqdo u Wasaqeysanyihiin.



Hadeysan gacmaha u wasaqeysneen si muqda si joogta ah ugu nadifi ado isticmalaya alkolada gacmaha lagu masaxo ama saabuun iyo biyo.



ka ilaali naftada iyo dadkakale inay xanunsadaan

Gacmaha dhaq

- kadib markad qufacdo ama Hindhisto
- markad xanaaneysid bukanka
- kahor, kadib ama inta ad cuntada diyarineysid
- kadib markad suuliga isticmasho
- markay gacmaha si muqata u wasaqaysanhiing
- kadib markaad Xolaha maareysid Ama qashinka xolaha.



Ka ilaali dadka kale inay jiradaan

Marka ad qufaceysid ama Aad hindhiseyso dabool afka iyo sanku xusulka oo laban ama tiish.



Tiishka ku tuur markiba qashin qub xiran markad isticmasho.

Kudhaq gacmaha alkolada gacmaha lagu masaxo ama saabuun iyo biyo marka aad qufacdo ama hindhisto iyo marka aad xanaaneysid bukanka.



Ka ilaali dadka kale inay jiradaan

Iska ilali isku dhawashaha marka ad daremeysid qandho ama qufac.



Iska ilali candhuf kutufida bulshada dhaxdeda.



Hadad qabtid qandho, qufac iyo nefta o ku dhibta radso daryel cafimad lana wadag khda hore ee safar Bixiyaha daryelka cafimad.

